IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad Muqdisho, 20ka Feb. 1978 L.2R2

**L*aan*ta Fa*a*finta R*as*mig*a* *ah* *ee* M*ada*xtooy*ada* J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

SHARCI L. 5 ee 2 Feb. 78, Heshiiska Amaahda ee dhex-maray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Banka Amaahda ee Jarmalka Federaaliga ah. Bogga 97

LAW N. 5 of the 2 Feb. 78, The Commodity loan Agreement concluded between the Somali Democratic Republic and the German Kreditanstal fur wuederaufban. » 98

**BOGGA LABAAD**

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 8 ee 4 Feb. 78, Ku wareejin guri Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed. » 99

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 9 ee 11 Luulyo 77, Qaadid Guri dan guud aawgeed ee waqti hore uu lahaa Sheekh Maxamuud Maxamed Faarax. » 100

**BOGGA SADDEXAAD**

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 28.1.78, Bed. Naado Dhul Jaalle Saynab Nuur Gaabow L 80 » 103

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.1,.78 Bed. Naado Dhul Jaalle Axmed Yuusuf Maxamed L 81

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.1,.78 Bed. Naado Dhul Jaalle Faaduma Cali Bin Cali L.82 » 104

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.1,.78 Bed. Naado Dhul Jaalle Cabdi Xaaji Maxamed L.83

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.1,.78 Bed. Naado Dhul Jaalle Axmed Caalin Cabdi L.84 » 105

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31.1.78, Naaaado Dhul Jaalle Maxamed Barre Abtidoon L.85

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31.1.78, Naaaado Dhul Jaalle Axmed Xaaji DiiriyeXersi L.86 » 106

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31.1.78, Naaaado Dhul Jaaaale MaxamedCaliAbtidoon L.87

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31.1.78, Naaaado Dhul Jaalle Dahaba Cabdi Ismaaciil L. 88 » 107

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31.1.78, Naaaado Dhul Jaalle Caasha Daahir iyo Qaabuul Barçadle L. 89

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31.1.78, Naaaado Dhul Jaalle Maxamed Cali Axmed L. 90 » 108

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31.1.78, Naaaado Dhul Jaalle Cabdikariim Xaaji Xuseen L.. 91

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31.1.78, Naaaado Dhul Jaalle Sheekh Cabdi Xasan L. 92 » 109

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31.1.78, Naaaado Dhul Jaalle Cusmaan Xaaji Cumar L, 93

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31.1.78, Naaaado Dhul Jaalle Cumar Muuse Saciid L. 94 » 110

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31.1.78, Naaaado Dhul Jaalle Caasha Daahir Cilmi L. 95

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31.1.78, Naaaado Dhul Jaalle Shirkadda Alla Magan L. 96 » 111

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYEED, 24.1.78 Heer-ka Sarrifka Lacagaha Qalaad 97

**MAXKAMADDA GOBALKA BARI EE BOOSAASO 31.7.77 lumid Jeeg lam.204800 ku qoran Sh.S.15,000 uu leeyahay Cabdulkhaaliq Saciid Naasir L.98** » 112

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 30.1.78, lumid Jeegga W. L. 103177 ku qoran Sh. So. 10.000 u lee-

**BOGGA KOOWAAD**

# SHARCI

SHARCI L. 5 ee 2 Feb. 78, Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Banka Amaahda ee Jarmalka Federaaliga ah.

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad tan labaad iyo tan seddexaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sarciyada tirsigoodu yahay 1, 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1976;

ISAGOO ARKAY: Heshiiska amaahda ah ee lagu kala saxiixday Magaalada Muqdisho taariikhdu markay ahayd 17.1.1978 kana dhaxeeyay Dawladda J.D.S. iyo Baanka amaahda ee Jarmalka (Kreditanstalt fur wiederaufbau);

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada ee 19.1.1978.

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Sharciga soo socda:-

Qod. 1aad

Heshiiska amaahda (Commodity loan Agreement) dhexmarayna J.D.S. iyo Banka Amaahda ee Jarmalka lagu kala saxiixday magaalada Moqdisho 17.1.1978 waa la meelmariyay.

Qod. 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa dalka J.D.S. astaan sharci ah, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Qod. 3aad

Heshiisku wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho, 2 Feb 1978

**MADAXWEYNAHA J.D.S.**

LAW. N. 5 of the 2 Feb. 78, The Commodity loan Agreeement Concluded between the Somali Democratic Republic and the German Kreditanstalt fur wuederaufban.

THE PRESIDENT

OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

HAVING SEEN: The first, second and third Charter of October 21st Revolution of 1969;

HAVING SEEN : Law No. 1, 17, 18 and 19 1st July 1976;

HAVING SEEN: The Commodity loan agreement signed at Mogadishu on 17th January 1978 between the Somali Democratic Republic and the German Kreditanstalt Fur Wiederaufbau;

TAKING NOTE : Of the approval of the Political Bureau and Council of Minister on 19.10.1978.

Hereby promulgates

the following law :

Art. 1

The Commodity loan Agreement concluded between the Somali Democratic Republic and the German Kreditanstalt fur Wiederaufbau signed at Mogadishu on 17 January is hereby ratified.

Art. 2

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic and shall be published in the Official Bulletin.

Art. 3

This law shall come into force by signature of the President of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu, 2 Feb 1978.

**PRESIDENT OF THE S.D.R.**
**MOHAMED SIAD BARRE**

BOGGA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 8 ee 4 Feb. 78, Ku wareegin Guri Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka. Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada 1, 17, 18 iyo 19 ee 1-7-76.

ISAGOO AQOONSAN: Inay tahay lagama maarmaan in loo yeelo Xafiisyo Ururka dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed oo dhawaan la dhisay awoodna uusan hadda u haysan inuu dhisto Guri cusub.

ISAGOO TIXGELINAYAA: Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo golaha Wasiirada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda :

Qod. 1aad

Maadaama, Ururka dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed, oo dhawaan la abuuray, uusan laheyn awood dhaqaale oo u ku dhisto Guri cusub oo gaar u ah waxaa loo wareejinayaa Guriga ku yaal Jidka Soomaaliya ee Degmada X. Weyne oo hadda ay ku jiraan ciidanka Guulwadayaasha Xamar iyo qaybta Faafinta Rasmiga oo ka tirmsan xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

Qod. 2aad

Guriga lagu tilmaamey Qodobka 1aad waa in si degdeg ah looga baxaa loona baneeyaa Ururka dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

Qod. 3aad

Xeerkaan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, wuxuunna dhaqan geleyaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

MADAXWEYNAHA JDS
Jaalle S Gaas Maxamed Siyaad Barre

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY
DIIWAANKA LAMB. 1 BOGGA LAMB. 14
Muqdisho 5 Feb. 1978
HANTIDHAWRKA GUUD

XEER L. 9 13 LUG. WHG.3.23.G580. Qaadid Guri dan guud awgeed ee waqti hore uu lahaa SHEEKH MXAMUUD MAXAMED FAARAX - oo ay la wareegtay Dawladdu - kuna yaal Muqdisho - Degmada Wardhigley - kuna fadhiya mq. 900.-

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ANNAGOO ARAGNAY: Warqaddii Koowaad, labaad iyo tan seddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY: Shirciyada lamb. yihiin 17.18.19 soo baxday 1. Luuliyo 1976 oo ku saabsan xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed;

ANNAGOO ARAGNAY: Xeerka Shirciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Setembare 1973;

ANNAGOO ARAGNAY: Arjigii uu keensaday SHEEKH MAXAMUUD MAXAMED FAARAX markay taariikhdu ahayd 27 Juun, 1957, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dawladeed, ku yaal Muqdisho - Degmada Wardhigley - kuna fadhiya mq. 900;

ANNAGOO ARAGNAY: Naqshadda lamb. 1210 kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dawladda Hoose ee Xamar, fadhigoodii 250aad taariikhdeeduna ahayd 30 Jennayo 1960 kuna sabsan dhismo guri;

ANAAGOO AQOONSAN: Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 900 loona tiriyey SHEEKH MAXAMUUD MAXAMED FAARAX sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 22 Dicembre 1958;

ANNAGOO ARAGNAY: Warqadda qiimaynta ee ku saabsan Guriga uu leeyahay SHEEKH MAXAMUUD MAXAMED FAARAX oo ay soo sameeyeen Guddi loo xilsaaray kana kooban Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo dhulka ee W.H.G. INJ. CEYDARUUS CISMAAN KENEDIID, Maamulaha Waaxda Dhulka INJ. XAASHI AXMED CEYDIID iyo INJ. XUSEEN CABDI MAXAMUUD taasoo muujinayso qiimaha guriga in uu yahay lacag dhan Sh. S. 295.050/ hase yeeshee laga jaray qiimaha dhaca ahaan Sh. So. 59.010/ oo u dhigantahay 20% qiimaha asalka ee guriga, sidaasne qiimaha dhamaadka noqday lacag dhan Sh.S. 236.040./ (Lababoqoliisoddoniilixkuniyoafartan) shiliin - eeg qiimaynta halkaan ku lifaaqan;

ANNAGOO TIXGELINAY: Go'aanka ka soo baxay MADAXTOOYADA J.D.S. kuna saabsan la wareegidda Gurigaas;

X E E R

Waxaa la cadeeynayaa in loo qaaday Dan Guud awgeed guriga uu lahaa SHEEKH MAXAMUUD MAXAMED FAARAX, iyadoo loo celinayo maqdhow gaaraya Sh. S. 236.040/ Laba boqosiisoddoniilix-kuniyo afartan shillin. Sida ka muuqato qiimaynta oo kor ku til-maaman.

Isla markaas waxaa la caddeynayaa in qiimahaas uusan ku jirin kan dhulka.

Lacagta kor ku qoran waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Wasaa-radda Maaliyadda.

Muqdisho. 15 Luy. 1977.

Ku-simaha Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud
S/Gaas MAXAMED SHEEKH CISMAAN

Ku-simaha Wasiirka Maaliyadda
S/Gaas MAXAMED SIYAAD BARRE

N U QU L.

WAAN ARAGNAL EE DIIWAANGELINNAY
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb 27
Muqdisho, 19 Luy. 1977.
Ku-Xigeenka Hantidhowraha Guud
Sax. Yuusuf Cali Nuur.

## BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD
### WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
### N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caasha Shariif Cumar u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 17.12.1977 uu ku weydiisanayay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Retangolar addimihiisuna yihiin mt.40X30 kuna fadhiya 1.200/Mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman.

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO
Koonfur waxaa ka xiga: DHUL DOWLADEED.
Galbiid waxaa ka xiga: DHUL DOWLADEED
B a r i waxaa ka xiga: W A D D O

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee W. H. G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 25.1.1978

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 79

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD
### WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
### N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhul uu soo weydiistay Jaalle Saynab Nuur Gaabow maalintii 11/12/1960 loona oggolaaday oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Jidka Sanca uu iska beddelay cabbirkii hore qaabkiisu ahc Regtangulcr addimihiisuna ahcyeen 40×25 kuna fadhiya mq. 1000/- sababtoo ah Qorshaha dhulka oo is beddelay. Sidaas aawadeed Naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa BF/1334/1006-67 ee 11-6-1967 kana baxday Xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman: Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo Jaalayaashaas qaabkiisu waa saddex-gees addimihiisuna yihiin 28+20×30:2 kuna fadhiya mq. 720/=.

Soohdimihiisuna yihiin sida soo socota
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul gal lam. 49.
Koofur waxaa ka xiga: Waddo;
Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Sanca
Bari waxaa ka xiga: G.L. 70361.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee W. H. G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weyidiistay Jaalle Axmed Yuusuf Moxamed maalintii 7.8.67 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho Degmada, Hodan qaabkiisuna ahaa Rettangolo Adimihiisuna ahaayeen, 50×60 kuna fadhiyay, 3000/= mdh. looga qaaday danta guud, loogu-na beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdishu degmada Yaaq shiid. jidka 21 Okt. sidaas aawgeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lam-markedu ahaa, MWD 137/8/1371-68 ka baxday Xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Yaaqshiid jidka 21 Oktoobar qaabkiisuna waa, Trabesiyo addimihiisuna yihiin, 50×40X15 kuna fadhiya 1350/= mdh. soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga Waddada 21 Oktoobar
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul L. 494—495
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
Bari waxaa ka xiga: Waddada Jubbada Sare.

Muqdisho, 30.1.1978

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 81

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle, Faduma Cali Bin Cali maalintii 30/4/68. loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada, 7km. qaabkiisuna ahaa Retancolar. Adimihiisuna ahaayeen, 50×40= kuna fadhiyay, 2000 mdh. looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Hodan. jika sidaas aawgeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa, 502. oo ka baxday Xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Hodan jika qaabkiisuna waa ,Retangolar Adimihiisuna yihiin, 20×30 kuna fadhyia 600. mdh.
soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul L. 434k.
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.
Bari waxaa ka xiga: Dhul L. 437.

Muqdisho, 30.1.1978

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la cadeynayaa in dhulkii uu soo weyidiistay Jaalle, Cabdi Xaaji Maxamed maalintii 10.6.62/= loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho. Degmada Deyniile qaabkiisuna ahaa Retang. Addimihiisuna ahaayeen, 50×60/= kuna fadhiyay, 3000/ mdh. looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaqshiid. Jidka 21 Oktoobar sidaas aawgeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkedu ahaa, 547739/= oo ku baxday Xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Yaashiid. jidka 21 Oktoobar. qaabkiisuna waa Retangolar. Addimihiisuna yihiin, 20×30/- kuna fadhiya 600 /mdh.

soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:
Waqooyi waxaa ka xiga:Wadada 21ka Oktoobar.
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 480.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 473.
Bari waxaa ka xiga : Dhul Lamb, 475

Muqdisho, 30.1.1978

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 83

## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## BEDDELAAD DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Axmed Caalin Cabdi maalintii 23-2-1960 loona oggolaaday oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley Jidka uu iska beddelay cabbirkii hore qaabkiisu ahaa Rettangolo addimihiisuna ahaayeen 28×19 kuna fadhiya mq. 532 sababtoo ah qorshaha dhulka oo is beddelay. Sidaas aawgeed Naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MW 3/23/356 kana baxday Xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku ku tilmaaman:

, rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo Jaallayaashaas qaabkiisu waa Rettangolo addimihiisuna yihiin 29,40×14,10 kuna fadhiya mq. 414,54

Soohdimihiisuna yihiin sida soo socota
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Bashiir Cali
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
Bari waxaa ka xiga: Qabri iyo Moxamed Cali

Muqdisho, 30.1.1978

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O   D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Mamaxed Barre Abtidoon. u soo qortay Arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka Maalintii taariihkdu ahayd 29/11/77. uu ku weydiisanayey Gabal Dhul Dawladeed ah ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hawl-wadaag. qaabkiisuna yahay Regtangolar Addimihiisuna yihiin 13,50×13,50= kuna fadhiya 182,25. Mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.
Koonfur waxaa ka xiga: Sheekh Cabdi.
Galbeed waxaa ka xiga: Sheekh Aadan.
Bari waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee W. H. G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 31.1.78

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 85

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O   D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Axmed Xaaji Diiriye Xirsi u soo qortay Arji waxaadatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 3/9/1977 uu ku weydiisanayey Gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar Degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Trebesiyo Addimihiisuna yihiin 82+70×30 kuna fadhiya 2280/=mdh: soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dowladeed.
Koonfur waxaa ka xiga: Waddada Ummadda.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.
Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee W. H. G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 31.1.78

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 86

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O   D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Maxamed Cali Abtidoon. usoo qortay Arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 31/8/74. uu ku weydiisanayey Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid qaabkiisuna yahay Regtangolar, Addimihiisuna yihiin 30×40= kuna fadhiya 1200. Mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.
Bari waxaa ka xiga: Waddada Balcad.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee W. H. G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 31.1.78

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 87

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O   D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Dahaba Cabdi Ismaaciil uu soo qotey Arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariihdu ahayd 23/9/75 uu ku weydiisanaayey Gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiistuna yahay Regtangolo Addimihiisuna yihiin 30×20 kun fadhiya 600/= mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaamän:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 204
Koonfur waxaa ka xiga: Jid
Glbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 776
Bari waxaa ka xiga: Dhul Lam. 778

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee W. H. G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 31.1.78

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 88

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O  D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Caasha Daahir iyo Qabuul Barqadle u soo qortay Arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 30/11/77 uu ku weydiisanayey Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada 21 Oktoobar. qaabkiisuna yahay Trabesiyo. Addimihiisuna yihiin (40+38)×20=368 kuna fadhiya 924Mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo sideet Metir ah.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.
Bari waxaa ka xiga: Wadada Jubada Sre.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshada Dhulka oo taal waaxda dhismha iyo dhulka ee W. H. G waxaana laga doodi karaa muddo (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 31.1.78

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 89

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O  D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Maxamed Cali Axmed u soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka Maalintii Taariikhdu ahayd uu ku weydiisanayey gabal Dhul Dowladeed ah ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan. Qaabkiisuna yahay Retangolar. Addimihiisuna yihiin 28X20 kuna fadhiyo 560 Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:-

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lamb.239K.
Galbeed waxaa ka xiga WADDO
B a r i waxaa ka xiga: DHUL LAMB.267k.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee W. H. G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 31.1.78

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 90

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O   D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Cabdikariim Xaaji Xuseen X. Muuse u soo qortay Arji waaxdatan dhismaha iyo Dhulka maalintii Taariikhdu ahayd 2.1.78. uu ku weydiisanayey Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hawl Wadaag. Qaabkiisuna yahay Regtangolar Addimihiisuna yihiin 36X27 kuna fadhiya 972Mdh; Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku Tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO.
Koonfur waxaa ka xiga: WADDO.
Galbeed waxaa ka xiga: WADDO
B a r i waxaa ka xiga: WADDO

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee W. H. G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Moqdisho, 31.1.78

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Xuseen Cabdi Maxamed

L. 91

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O   D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Sheekh Cabdi Xasan Maxamuud u soo qortay Arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka Maalintii taariikhdu ahayd 29.11.1977 uu ku weydiisanayey gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hawl-wadaag. kuna fidhiya 182,25. Mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku Tilmaaman;-

Waqooyi waxaa ka xiga: Jaalle Maxamed Barre
Koonfur waxaa ka xiga: JID
Galbeed waxaa ka xiga: Jaalle Sheekh Aadan
B a r i waxaa ka xiga: WADDO

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Moqdisho, 31.1.78

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj Caydaruus C. Keenadiid

L. 92

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Cusmaan Xaaji Cumar u soo qortay waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka Maalintii Taariikhda ahayd —— uu ku weydiisanayey Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada .Qaabkiisuna yahay Addimihiisuna yihiin kuna fadhiyo Mdh: Soohdimihiisuna yihiin Sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO
Koonfur waxaa ka xiga: DHUL DAWLADEED.
Galbeed waxaa ka xiga: WADDADA SANCO
B a r i waxaa ka xiga: WADDO

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Moqdisho, 31.1.78

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj Caydaruus C. Keenadiid

L. 93

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Cumar Muuse Saciid u soo qortay Arji waaxdatan dhismaha iyo Dhulka Maalintii taariikhdu ahayd 29.12.1977 uu ku weydiisanayey Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Regtangolar. Addimihiisuna yihiin 27.00X13.50 kuna fadhiya 64.50 Mdh Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku Tilmaaman:-

Waqooyi waxaa ka xiga: JID
Koonfur waxaa ka xiga: JID YAR
Galbeed waxaa ka xiga: JID
B a r i waxaa ka xiga JIDKA KACAANKA

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. w. xaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Moqdisho, 31.1.78

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA
Inj. Cabdikariim Cige

L. 94

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## NAADO DHUL

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Caasha Daahir Cilmi u soo qortay Arji waaxdatan Dhismaha iyo dhulka Maalintii Taariikhdu ahayd 5.10.1975 uu ku weydiisanayey gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-Shiid. Qaabkiisuna yahay Sadex Gees Addimihiisuna yihiin 24+30X20 kuna fadhiya 540Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku Tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO
Koonfur waxaa ka xiga: WADDO
Gableed waxaa ka xiga: G.L.6.
B a r i: waxaa ka xiga: G.D.2.4.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee W. H. G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Moqdisho, 31.1.78

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA
Inj. Cabdikariim Cige

L. 95

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## NAADO DHUL

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Shirkadda alla Magan u soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalintii Taariikhdu ahayd 16.1.1978 uu ku weydiisanayey gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Afar gees Addimihiisuna yihiin 27X27 kuna Fadhiya 729 Mdh: Soohdimihiisuna yihiin Sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO 12mt
Koonfur waxaa ka xiga: WADDO 6 met.
B a r i waxaa ka xiga: WADDO 12 mt.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Moqdisho, 31.1.78

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA
Inj. Cabdikariim Cige

## BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

UJEEDDO: Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.

### GUDDOOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN: Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Setembar, 1964 laguna beddely Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda ee awood siinaya BANKIGA DHEXE SOOMAALIYA inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO TIXGELINAYA: Isbeddelka qiimaha lacagaha qalaad ee samaynaya ganacsiga dunida. sida joogto ahaan naga soo gaarta Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY: In la daryeelo ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha waddankeenna.

AYAGOO OGSOON: In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 242 ee 24.1.1978 sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lambar 27 ee 26kii Nofeembar, 1968, uu dhigayo.

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata laga bilaabo 25.1.1978 waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

| | | oo Sh. So. ah | oo Sh. So. ah |
|---|---|---|---|
| **Lacagta Qalaad** | | **Heerka Iibsashada** | **Heerka Gadidda** |
| Us $ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| Uk £ | 1.00 | 11.9559 | 12.1950 |
| D.M. | 1.00 | 2.9441 | 3.0030 |
| Lit | 140.07 | 1.0000 | ——— |
| Lit | 137.27 | ——— | 1.0000 |
| Fr. Fr. | 1.00 | 1.3265 | 1.3530 |
| Sw.Fr. | 1.00 | 3.1205 | 3.1829 |
| Dj.Fr. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |
| Srl. | 1.00 | 1.7576 | 1.7928 |
| KD. | 1.00 | 21.7521 | 22.1871 |
| UAE Dh. | 1.00 | 1.5769 | 1.6084 |

**SACIID MAXAMED CALI**
**AGAASIMAHA GUUD**

MAXKAMADDA GOBOLKA BOOSAASO

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Bari ee hadda Jooga Degmada Qardho; Haddaan arkay warqaddii Dacwadda ahayd ee uu soo qortay Jaalle Cabdulkhaaliq Saciid Naasir, degan Degmada Boosaaso, ahna Ganacsade, Taas oo uu ku dacweynayey Asenyada Lambarkeedu yahay (Jeeg Lam. 204008 ee ay ku qorantahay Sh. So. 15.000,00 ee taariikhdu ahayd 20.7.1977 kuna qornaa magaca Jaalle Abuubakar Saalim Qarxaan ee Degan Xamar, Jeegaas oo dhumay Taariikhdu markay ahayd 20.7.77, kuna dhumay Boosaaso dhexdeeda.

Maxkamadda markay aragtay Qodobka 69 Dekreeto Lejislatiibo ee 9.9.65 Lambar 2;

Waxey amreysaa Maxkamaddu inaan la qaadan karin Jeegaas lambarkiisu kor ku yaal lana aqoonsan karin Jeega Lam. 204008 Sh. So. 15.000/- ay ku qorantahay, kuna dhigan magaca Jaalle Abuubakar Saalim Qarxaan.

Maxkamaddu waxey oggolaatay in Jeeg horle loo sameeyo Jaalle Cabdulkhaaliq Saciid Naasir, markay dhammaato 30 beri laga bilaabo maanta 31.7.1977, laguna qoro Dekreetada Faafinta Rasmiga ah.
Isla markaas waxaa la amrayaa Jaalle Cabdulkhaaliq Saciid Naasir, in uu geliyo Faafinta Sharciga, bixiyana Kharajka Faafinta.
Maxkamaddu waxey amreysaa Bankiga Ganacsiga Ummadda Gobolka Bari Boosaaso iney ku dhejiyaan Derbiyada Xafiisyada muddo ah 30 beri (soddon), Dekreetadaan.

Qardho, 31.7.1977.

GUDDOOMIYAHA MAX. GOB. BOOSAASO

Jaalle Axmed Cabdulle Habarwas

L. 98

# JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Markuu Arkay: dacwadda kor ku qoran;
Markuu Arkay: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;
Hadduu Aray qod. 69 D.L.9-9-65 N.2; lumidda Jeega wareega ee Lambarkiisu yahay 103177 kuna qoran tahay Sh. So. 10.000 Bangiga Ganacsiga Laanta Hargeysa.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboneysiiyo Jeegga Wareega ka dib markii ay soo wareegto 15 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeegaga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Cabdi Diiriye Seeraar. ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo mudada 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 30-1-1978.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
Dr. CABDULLAAHI DAAHIR BARRE.

L. 99